**Waa maxay 'Kooxda A Strep'?**

Dhawaan waalidiinta ayaa la weydiistay inay ka digtoonaadaan calaamadaha caabuqyada Group A Streptococcal, oo sidoo kale loo yaqaan 'Kooxda A Strep'. Dukumeentigani waxa uu ku siinayaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxa la iska ilaalinayo.

**Waa maxay Kooxda A Strep?**

Kooxda A Strep waa bakteeriyo caadi ah oo si aan dhib lahayn ugu noolaan karta dhuunteena iyo maqaarkeena. Qaar ka mid ah Kooxda A Strep waxay keeni karaan cudurro fudud sida dhuun xanuun ama cudurro ka sii daran sida qandho guduudan. Cuduradaan waxaa si fudud loogu daweyn karaa antibiyootig.

Marar dhif ah, Kooxda A Strep waxay keentaa jirro aad halis u ah sida oof-wareen (cudur laabta oo xun), sepsis (marka caabuqu dhiigga galo) ama caabuqyada lafaha. Cudurradan aadka u daran waxay u baahan yihiin daaweyn isbitaal.

Waxaa muhiim ah in la xasuusto in inta ugu badan cunaha iyo qufaca ay sababaan fayrasyada oo ay iyaga laftoodu ka roonaan doonaan.

**Sidee Kooxda A Strep u fiddaa?**

Kooxda A Strep waxay ku fiddaa hindhisada, qufaca iyo xiririrka maqaarka oo toos ah.

**Waa maxay calaamadaha Kooxda A Strep?**

**Kooxda A Strep ee khafiifka ah waxay keeni**

**kartaa:**

- cune xanuun leh, oo cas;
- qandho;
- dahaarka cad ee carrabka;



- caabuqyada maqaarka;
- qandho guduudan. Qandhada guduudan waxay ku bilaabataa cune xanuun, madax-xanuun, qandho iyo qanjidhada qoorta oo barara, badanaa waxaa raacda finan kaas oo mararka qaarkood lagu dareemo sida warqad ciid ah, finanka waxay noqon karaan kuwo adag in lagu arko maqaarka madow ama maariinka ah laakiin weli waad dareemi kartaa.



**Nooca aadka u daran ee Kooxda A Strep waxay keeni kartaa:**

- qandho sare;
- murqo xanuun daran;
- xanuun, barar iyo casaan goobta dhaawaca;
- shuban iyo matag.

**Maxaan sameeyaa haddii ilmahaygu leeyahay calaamadaha Kooxda A Strep?**

Haddii ilmahaagu leeyahay calaamadaha Kooxda A Strep, la xidhiidh GP-gaaga ama Dhakhtarkaaga Guud ama dhakhtarka saacadaha shaqada ka baxsan. Eeg [www.nidirect.gov.uk/articles/gp-out-hours-service](www.nidirect.gov.uk/articles/gp-out-hours-service)

Haddii ilmahaaga la siiyo antibiyootiga Kooxda A Strep waxay u baahan doonaan inay ka maqnaadaan dugsiga ugu yaraan 24 saacadood.

Fadlan raadso daryeel caafimaad oo degdeg ah haddii:

- Ilmahaagu u muuqdo mid aad uga liita sida caadiga ah;
- ilmahaagu ka sii darayo;
- tani ka duwan tahay qufacooda iyo hargabkooda caadiga ah.

**Ma sameyn karnaa wax si aan u joojino fiditaanka Kooxda A Strep?**

Haa Waxyaalaha fudud waxay sameeyaan farqi weyn. Marka lagu daro gacmo-dhaqashada caadiga ah ee saabuun iyo biyo, waxaad ku yareyn kartaa fursadaha faafidda Kooxda A Strep:

- qabo - isticmaal istiraashooyin marka aad qufacayso ama hindhisayso, ku dhiirigeli ilmahaaga inuu sidaas oo kale sameeyo;
- qashin ku rid - istiraashooyinka la isticmaalay ku tuur qashinka;
- dil - gacmahaaga ku dhaq saabuun iyo biyo kulul.

**Talaalada**

Hubi in talaaladu ay dhamays tiran yihiin. Kor u kaca kiisaskii dhawaa ee Kooxda A Strep ee UK oo dhan waxaa laga yaabaa inay sabab u tahay qayb ka mid ah isku dhafka bulsheed, taas oo sidoo kale keeni karta cudurro kale oo wareegaya isla waqti isku mid ah.

PHA ayaa sidaas darteed ku boorinaysa qof kasta oo u qalma tallaalka hargabka bilaashka ah inuu helo fursadda ugu horreysa. Waxaan si gaar ah ugu boorin lahayn waalidiinta dhammaan carruurta dugsiga ka hor ee da'doodu tahay laba sano iyo ka weyn iyo kuwa da'doodu u dhaxayso 6 bilood ilaa 2 sano ee kooxaha halista ugu jira inay ka faa'iidaystaan tallaalka hargabka bilaashka ah.

War dheeraad ah ka hel halka tallaal lagu helo barta
www.nidirect.gov.uk/wintervaccines